

Tilmaamaha Sanduuqa Gargaarka Degdegga ah ee Lutheran Family Services – Lexington Wajiga Labaad

Shuruudaha U-qalmitaanka:

- Waa in lagaa shaqo joojiyay shirkadda **Tyson Foods** ee Lexington, Nebraska, taasoo qayb ka ahayd xiritaankeedii rasmiga ahaa **Janaayo 20, 2026**.
- U-qalmitaanku wuxuu ku kooban yahay qoysaska leh ugu yaraan hal ilmo oo da'diisu tahay **18 sano ama ka yar** (qoysaska ama waalidiinta keligood ah).
- Haddii aad u qalanto:
 - Qof kasta oo **qaangaar ah (19 sano iyo ka weyn)** wuxuu heli doonaa **\$250**
 - Ilmo kasta (**18 sano iyo ka yar**) wuxuu heli doonaa **\$150**
 - Lacagtu waa hal mar oo **caawimaad lacageed ah**
- Waa inaad keentaa caddeyn muujinaysa xubnaha guriga (household), sida:
 - Heshiiska kirada (lease agreement)
 - Warqad ka timid DHHS
 - Warqad dugsi
 - Ama dukumenti kale oo la aqbali karo
- Codsadayaashu waa inay si **shaqsi ahaan (in person)** uga soo xaadiraan xafiiska Lutheran Family Services ee Lexington, NE, si ay u dhammaystiraan habka diiwaangelinta (intake), isla markaana keenaan dukumentiyada loo baahan yahay
- Lacagta waa xaddidan tahay, waxaana lagu bixinayaa habka **first come, first serve (kii soo horreeya ayaa helaya)**

Diiwaangelinta (Registration):

- Ballamaha waxaa la sameysan karaa **Isniinta oo keliya**, laga bilaabo **9:00 subaxnimo ilaa 4:00 galabnimo**
- Waa inaad marka hore sameysato ballan adigoo wacaya mid ka mid ah lambarradan:
 - Soomaali/Ingiriisi: **308-532-0587**
 - Isbaanish/Ingiriisi: **308-746-8569**
- Adeegyada turjumaadda (interpretation) waa la heli doonaa haddii loo baahdo

Qaado Jeegga (Check Pickup):

- Jeegagga waa in laga qaataa **xafiiska LFS ee Lexington** adigoo shaqsi ahaan u imanaya
- Jeegga waxaa la siinayaa oo keliya qofka magaciisa ku qoran yahay, waana inuu keena **aqoonsi (ID)**
- Jeegagga waxaa la bixiyaa **maalinta Jimcaha oo keliya**